JAMHUURIYADDA SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADA HARGEYSA
Hargeisa District Court المحكمة المحلية

MDH/J/DML/1077/2023 TAAR: - 16/10/2024

| | | |
|---|---|---|
| Dacwoodayaal:- | Ilma Cabdillaahi Yaasiin | =Hargeysa= |
| Wakiil:- | Axmed C/laahi Yaasiin | =Hargeysa= |
| Qareen:- | C/nuur Xuseen Axmed | =Hargeysa= |
| Dacweysane:- | Salaan C/laahi Yaasiin | =Hargeysa= |
| Soo-dhexgalayaal:- | Ilma Ismaaciil C/laahi Yaasiin | =Hargeysa= |
| Qareen:;- | Siciid Xuseen Yuusuf | =Hargeysa= |
| Soo dhexgale:- | Siciid Jaamac Yaasiin | =Hargeysa= |
| Qareen:- | Siciid Xuseen Yuusuf | =Hargeysa |

MDH MAXKAMADDA DEGMADDA HARGEYSA HARGEISA DISTRICT COURT JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# UJEEDO: QARAAR MADAXBANAANAYN BEER

**Maxkamadda Degmada Hargaysa:-**

**Markay Aragtay:-** Gal'dacwadeedka Madaniga ah ee sumadiisa, dhinacyadiisa iyo ujeedadiisuba sare ku xusan yihiin.

**Markay Aragtay:-** Arjiga Codsiga madaxbanaanaynta beera ee ku Taariikhaysan **16/10/2024** ee uu Maxkamadda u soo gudbiyey Qareenka Soo-dhexgalayaasha **Siciid Xuseen Yuusuf**, nuxurkiisuna yahay in loo madaxbanaaneeyo beertooda maadama ay soo dhamaatay dacwadii dhaxaysay iyaga iyo ilma C/laahi Yaasiin galkiina uu dib ugu soo noqday Maxkamadda Degmada Hargeysa ee uu ka bilaabmay.

Sidaa daraadeed waxa aan Maxkamadda sharafta leh ka codsanaynaa in maadaama **Ilma Ismaaciil C/laahi Yaasiin** iyagu beertooda gacanta ku hayaan loo madaxbanaaneeyo, loona tixgeliyo codsigan.

**Markay Aragtay:-** Qaraarka Maxkamadda Sare JSL ee sumadiisu tahay **MS/44/2024** kuna Taariikhaysan **15/08/2024** laguna qaraariyey:

1. Maxkamadda Sare JSL waxay ooday Gal'dacwadeedka sumadiisu tahay **MS/44/2024** kuna Taariikhaysan **21/07/2024** ka dib markii ay Rafcaanlayaasha Ilma C/laahi Yaasiin oo uu wakiil ka yahay Axmed C/laahi Yaasiin ka noqday Rafcaankii ay u soo qaateen Maxkamadda sare

sida ku cad Qoraalka Nootaayada ah ee ka soo baxay **Almis Public Notary** ee ku Taariikhaysan **14/08/2024.**

**Markay Aragtay:-**Xukunka Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Maroodijeex ee sumadiisu tahay **MRGMJ/DML/269/2023** kuna Taariikhaysan **10/06/2024** ee lagu xukumay qodobada **4, 5,6,7aad** sidan:

1. Waxa la ayiday xukunka Maxkamadda Degmada Hargeysa ee sumadiisu tahay **MDH/J/DML/1077/2023** Kuna Taariikhaysan 04/10/2023 ee Maxkamadda Degmadu ugu xukuntay Beerta cabirkeedu yahay 23.744 Hegtar Ilma C/laahi Yaasiin.
2. Waxa ay Maxkamadda Rafcaankan u xukuntay Ilma Ismaaciil C/laahi Yaasiin beertaas oo cabirkeedu **23.744 Hegter**, jihooyinkooduna yihiin Bari iyo Galbeed Waddo, Waqooyi Ilma Cabdi Cige, Koonfur Ilma C/laahi Muuse.
3. Soo dhexgale Siciid Jaamac Yaasiin waxa loo xukumay dhulkiisa laga iibiyey ee ku xusan Nootaayada sumadeedu tahay **Ref:DPN/MG/00468-/04/071** ee ku **Tr:24/04/2021** oo ka iibiyey Yuusuf C/laahi Yaasiin.
4. Maxkamadda Rafcaanku waxay gebi ahaan ba xayiraadii ka qaaday dhulka Dacwadu ka socotay ee lagu xayiray Xayiraada sumadeedu tahay **MRGMJ/DML/269/2023** ee ku **Tr:22/01/2024.**

**Markay Aragtay:-**Xukunka Maxkamadda Degmada Hargeysa ee sumadiisu tahay **MDH/J/DML/1077/2023** Kuna Tr: **04/10/2023** ee lagu xukumay qodobada **4 iyo 5aad** sidan:

1. Maxkamadda Degmada Hargeysa waxay xukuntay in aanay dhaxal ahayn beerta ku taala Biyo-shiinaha ee cabirkeedu yahay **23.744** Hegtar, jihooyinkeeduna kala yihiin Bari iyo Galbeed Waddo, Waqooyi Ilma Cabdi Cige iyo Koonfur Ilma C/laahi Muuse kana soo jeedin Marxuun C/laahi Yaasiin Maxamed.
2. Sidoo kale Maxkamaddu waxay xukuntay in beerta cabirkeeda iyo jihooyinkeedu ku xusan yahay Qodobka 4aad ee xukunkan ay tahay lahaanshiyo ay leeyihiin soo-dhexgalayaasha Ilma Ismaaciil C/laahi Yaasiin, cidii dood ka qabtaana ay dacwad ka furato Maxkamadda awooda u leh.
3. Xukunkan waxa loo cuskaday Qodobada **681, 682 XM.**

MAXKAMADA DEGMADDA HARGEYSA MDH HARGEISA DISTRICT COURT JAMHUURIYADDA SOMALILAND

**Markay Aragtay:-**Asbaabta sare ku xusan dartood iyo Qodobada sharci **293, 294, 295, 429 XHM iyo Qod.681, 682 XM**, Waxay soo saartay qaraar madax banaanayn Beerteed:-

# QARAARKA MADAX BANAANAYNTA BEERTA ILMA ISMAACIIL C/LAAHI YAASIIN

MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA: -

1) Waxay qaraarisay inay u madaxbanaan yihiin **Ilma Ismaaciil C/laahi Yaasiin** beerta ku taala Degmada Ib/koodbuur ee xaafada Biyo-shiinaha ee cabirkeedu yahay **23.744 Hegtar**, jihooyinkeeduna kala yihiin Bari iyo Galbeed Waddo, Waqooyi Ilma Cabdi Cige, Koonfur Ilma C/laahi Muuse, dhamaan tasarufaadka beertaas laga bilaabo maanta oo ay Taariikhdu tahay **16/10/2024.**
2) Qaraarkan waxa loo cuskaday Qodobada **293, 294, 295, 429 XHM iyo Qod.681, 682 XM.**
3) Qaraarkani wuxuu soo baxay maanta oo ay Taariikhdu tahay **16/10/2024.**

Allaah Mahad Leh

**C/shakuur Maxamed Ismaaciil**__________

**Garsooraha Maxkamadda Degmada Hargeysa**

**Kaaliye: Axmed C/laahi Aw-Daahir**__________